# Hab-raacyada, nidaamyada safafka iyo khidmadaha/kharashyadaha xannaanadda ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-13 sano ee Guddiga arrimaha ilmaha iyo dhallinyarada Dowladda Hoose Linköping

Nooca diseembar 2023

Taariikhda: 20231214
Hay`adda: Maamulka arrimaha waxbarashada

# Tusmada

**Ulajeeddada dokumentiga laga leeyahay** **5**
**Noocyada goobaha xanaanada ee laga helo Dowladda hoose** **6**
Xannaanada ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-5 sano 6
Xannaanada ilmaha da`dooda u dhaxayso 6-13 sano 6
**Kuma boos xannaanadda ilmaha laga siin karaa?** **7**
**Saacadaha goobaha ay furan yihiin** **8**
Isku-darka xannaanadaha ilmaha 8
Maalmaha aqoon-kororsiga shaqaalaha 9
**Codsashada xanaanada ilmaha dugsiga xanaanada iyo barbaarinta** **9**
Goobaha xannaanadda ee Dowladda Hoose maamusho 9
Xannaanada ilmaha ee gaar ahaanta loo maamulo 9
Damaanada booska 9
Nidaamyada safafka 10
**Codsashada goobaha wakhtilummiska** **11**
**Gogoldhig** **11**
**Khidmadaha/kharashyadaha** **11**
Khidmadaha/kharashyadaha ugu badan bishii 12
Khidmadaha/kharashyadaha xannaanada saacadaha hore iyo kuwa dambe ee habeenkii iyo sabti/axad/maalin fasax ah 13
Khidmadaha/kharashyadaha ee ilmaha da`dooda u dhaxayso 3-5 sano dugsiga xannaanadda guud 13
Khidmadaha/kharashyadaha xannaanadda ilmaha ee waalidka shaqo la`aan, fasaxa waalidiinta 13
Khidmadaha/kharashyadaha xannaanadda ilmaha ee kummeelgaarka ah da` dooda 6-13 sano u dhaxayso 13
Khidmadaha/kharashyadaha ilmaha oo la ogolaaday, xannaanadda ilmaha taasoo u sabab ah baahida taageero gaar ah 13
Xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta oo aan isku hoy ahayn 14
Ka jarista khidmadaha/kharashyadaha 14
Qaansheegashada 15
**Daqliga** **15**
Xisaabinta daqliyada 15
Daqliyada oo ay khidmadaha/kharashyadaha gundhigga u ah 16
Daqliyadaha kale ee canshuuraha laga bixiyo 16
Gunnooyinka kale ee gundhigga u ah khidmadaha/kharashyadaha 16
Wargelinta daqliga iyo wax iska beddelka khidmadaha/kharashyadaha 17
**Is-beddelada, hakad-gelin iyo ogeysiinta dib u soo celinta boosaska** **17**
Xaaladda qoyska oo wax iska beddeleen 17
Xannaanada ilmaha ee waalidiinta jirrada ku qoran ama qaato gunnada uurleeyda 18
Wargelinta is-beddelka ku meelaynta ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-5 sano oo waalidiintooda fasax ku maqan 18

Iska beddelka booska 18
Hakad 18
Ogeysiinta dib u celinta booska 19
**Xannaanadaha saacadaha habeenkii hore iyo kuwa dambe ba iyo sabti/axad/maalin fasax ah 20**
Yaa xaq ku leh xannaanadda saacadaha habeenkii hore iyo kuwa dambe ba iyo sabti/axad/maalin fasax ah? 20
Nidaamyada safafka hirgalay waa kuwee sideena loo codsada? 20
Khidmadaha/kharashyadaha 20
Saacadaha kormeerista 20
Keenista iyo ka kaxaynta 21
Haddii baahida ay wax iska beddesho maxaa dhici doono? 21
**Waaxda aleerjiya loogu talagalay ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-5 sano 21**
Warbixin ku saabsan maaraynta warbixin-shaqsiyeedka 21
**Su'aalo 23**

# Ulajeeddada dokumentiga laga leeyahay

Hab-raacyada waxaa go`aamiyay Guddiga arrimaha ilmaha iyo dhallinyarada waxayna ku saabsan yihiin dhaqdhaqaaqyada Dowladda Hoose. Dokumentigaan waxaa kaloo ku xusan turjumidda qodobada Xeerka iskuullada ee ku qeexan shuruudaha loo dejiyay, ganacsateyaasha ku talajira in ay maamulan dhaqdhaqaaqyada noocaan ah.

Degmada Linköping waxaa ku yaalaan dugsiyada xannaanadda, goobaha wakhtilummiska iyo xannaanada wax barida ku salaysan kuwaasoo hab gooni ama Dowladda Hoose ay maamusho. Sida hadba ku xusan Xeerka Iskuullada (2010:800) waxaa ku xusan in Maamulka degmada uu mas`uul ka yahay in dhammaan ilmaha degmada ku nool, ay helaan fursadda wax ku barashada dugsiga xannaanadda waa haddii xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiintooda ay doonayaan. Maamullada degmooyinka ay ku nool yihiin, waa in ay fuliyaan waajibaadkooda, iyagoo ilmaha fursad ka siiyaa wax ku barashada dugsiyada xannaanadda ee madaxbannaan. Maamulka degmo kasta waa in ardayda dhigata fasalka dugsiga xannaanadda, dugsiyada biloowga/hoose/dhexe iyo dugsiyada biloowga/hoose/dhexe ee gaarka ah ee u maamulka degmada maamulo uu boos ka siiyo goobaha wakhtilummiska. Hadba sida ku xusan cutubka 25:aad. qodobka 2:aad ee Xeerka Iskuullada waa in Maamulka degmada uu ku dadaalo in beddelka dugsiga xannaanadda ama goobaha wakhtilummiska, ilmaha la siiyo fursad xannaanadda waxbarasho ku salaysan, waa haddii xilhaayeha xannaanadda/waalidka u doonayo. Xannaanada noocaas ah waa in iyadoo la adeegsanayo dhaqdhaqaaqyada waxbarida lagu dareen-kiciya horumar iyo waxbarashada ilmaha. Dugsiga xannaanadda wuxuu leeyahay qorshaha waxbarshada (Lpfö 18) ee u gaar ah. Goobaha wakhtilummiska waxaa ka hirgala isla qorshaha waxbarshada (Lgr 22) ee dugsiyada biloowga/hoose/dhexe.

Dowladda Hoose ee Linköping ayaa maareyso goobaha xannaanadda hab waafaqsan sharciyada u degsan. Xeerarkan waxay ku salaysan yihiin hab-raacyada Xeerka Iskuullada iyo qorshaha waxbarashada u degsan dugsiyada xanaanada iyo goobaha wakhtilummiska (SKOLFS 2011:185, Lpfö 18 och Lgr 22). Xeerarka waxaa loogu talagalay in si cadaalad iyo amni ku salaysan loo maareeyo. Qodobada Xeerka Iskuullada waxaa kamid ah habka loo maareeyo boosaska goobaha xanaanada, tan kale Dowladda Hoose Linköping ayaa ansixiso xulashada hirgelin doonto oo waafaqsan sharciga (cutubka 8:aad dugsiyada xanaanada. Qodobka 19 §) . Ulajeedada nidaamyada laga leeyahay ayaa waxay tahay in qeexo sida Dowladda Linköping u maareyso boosaska goobaha xanaanada ee degmada.

Xannaanada ilmaha waxaa looga talagalay ilmaha/ardayda da`dooda u dhaxayso 1-13 sano.

- Ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-5 sano waxaa boos loogu soo bandhiga dugsiga xannaanadda /barbaarinta.
- Ardayda da` dooda 6-13 sano u dhaxayso waxaa boos loogu soo bandhiga goobaha wakhtilummiska ee ku yaalaan iskuulka ardayga ee u ku meelaysan yahay.
- Maamulo gaar ah ayaa ardayda da`dooda u dhaxayso 10-13 boos ka siiyo Dhaqdhaqaaqa wakhtilummiska ee loo yaqaano “öppen fritidsverksamhet” kuwaasoo ku yaalaan xaafadaha degmooyinka qaarkood.

# Noocyada goobaha xanaanada ee laga helo Dowladda hoose

Xannaanada ilmaha waxaa maareeyo waaxyadaha Dowladda hoose iyo shaqsiyaad dowladda hoose maalgeliso.

Barta internetka ee Dowladda hoose, www.linkoping.se/ waxaa laga aqrisan karaa liiska adreesyada iyo lanbarrada taleefoonada ee dhammaan maareyeyaasha. Halkaan waxaad kaloo ka aqrisan kartaa warbixin dheeraad.

## Xannaanada ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-5 sano

### Dugsiga xannaanadda

Dugsiyada xannaanadda waxay ku yaalaan goobo dhaqdhaqaaqa loola qabsiiyay.

### Xannaanad iyo wax-barid

Xannaanada wax-barida ku salaysan, waa qof gurigiisa ilmaha ku xannaanadeeyo.

### Xannaanadaha saacadaha habeenkii hore iyo kuwa dambe ba iyo sabti/axad/maalin fasax ah

Dhaqdhaqaaqa waxaa looga talagalay ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-13 sano oo u baahan kormeerid saacadaha habeenkii hore iyo kuwa dambe ba ama sabti/axad/maalin fasax ah.

## Xannaanada ilmaha da`dooda u dhaxayso 6-13 sano

### Goobaha wakhtilummiska

Dhaqdhaqaaqyada goobaha wakhtilummiska waxaa loogu talagalay ilmaha iskuullada ee da` dooda 6-13 sano u dhaxayso. Dhaqdhaqaaqa wuxuu ku meelaysan yahay iskuulka u ardayga dhigto, waxaana lagu dabarida fasalka dugsiga xannaanadda iyo dugsiyada biloowga/hoose/dhexe /dugsiyada biloowga/hoose/dhexe ee gaarka ah sannad-dugsiyeedyada 1-6.

Haddii ay jirto sabab gaar ah oo ilmaha lagu meeleeyo goobta wakhtilummis oo aan ku oolin agagaarka iskuulka, waxaa arrinta go`aan ka gaaro madaxa waaxda dugsiga bilowga, hoose, dhexe, wafdiga Guddiga arrimaha carruurta iyo dhalinyarada.

### Dhaqdhaqaaqa wakhtilummiska oo diwaangelinta u baahnayn

Laga bilaabo xilliga dayrta ee sannadka ardayga buuxsan doono 10 sano, waa in beddelka booska goobta wakhtilummiska la siiyo fursad dhaqdhaqaaqa wakhtilummiska oo diwaangelinta u baahnayn. Qodobkaan ayaa hirgalo haddii ardayga u sabab xiriir la leh jirka,

nafsiga iwm u horumarkiisa dartiisa baahan yahay taageero gaar ah oo keliya, ayaa la siin karaa fursadda goobaha wakhtilummiska (Xeerka iskuullada, cutubka 14:aad. Qodobka 7 §).

Maalmaha fasaxa iskuullada waxaa la siiyaa fursad kormeerid maalinle ah. Haddii loo baahdo xannaanadda subaxnimada waxaa boos loogu soo bandhiga goobaha wakhtilummiska ee iskuulka ilmaha.

### Xannaanada ilmaha ee kummeelgaar ah

Xannaanada ilmaha ee kummeelgaar ah waxaa loo heli karaa ilmaha iskuullada da` dooda 6-13 sano u dhaxayso, oo u baahan kormeerid saacado ama maalmo aan taxnayn ilmaha iskuullada oo kummeelgaar ahaan kormeerid u baahan. Xannaanada ilmaha ee kummeelgaarka ah waxaa la heli karaa, haddii fursad ay jirto iyo kaddib markii xilhaayeha xannaanadda/waalidka iyo Agaasimaha dugsiga ay arrinta ku heshiyaan.

### Xannaanadaha saacadaha habeenkii hore iyo kuwa dambe ba iyo sabti/axad/maalin fasax ah

Dhaqdhaqaaqa waxaa looga talagalay ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-13 sano oo u baahan kormeerid saacadaha habeenkii hore iyo kuwa dambe ba ama sabti/axad/maalin fasax ah.

## Kuma boos xannaanadda ilmaha laga siin karaa?

Xilhaayeha xannaanadda/waalidka ilmaha ayaa boos ka dalbado xannaanadda ilmaha, oona kaddib noqda milkiyeha booska xannaanadda. Haddii xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay wada nool yihiin, labadooda ayaa noqon doono milkiyeyaasha booska xannaanadda iyaga-na ka mas`uul ah bixinta khidmada/kharashka xannaanadda ilmaha.

- Fursadda xannaanadda waxaa la siiyaa ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-13 sano, kuna aadan xilliyada xilhaayeha xannaanadda/waalidka u shaqeeyo ama wax barto, oona sidaas darteed u baahan yahay xannaanadda. Macnaha baahida kormeerida/saacadaha kormeerida waxaa weeyaan, in saacadaha shaqada iyo/ama waxbarashada xilhaayeha xannaanadda/waalidka, saacadaha socdaallada iyo baahida nasashada u qabo shaqada habeenkii darteed.
- Kaddib markii si gaar ah looga arrinsado baahida kormeerida waxaa ilmaha boos laga siin karaa xannaanadda, xitaa haddii aysan jirin baahida kormeerida (Xeerarka iskuullada 8 cutubka. 5 iyo 7 §§, 14 cutubka. 5 iyo 6 §§, 25 cutubka. 2 §).
- Booska xannaanadda ilmaha waxaa la siiyaa ilmaha, da`dooda u dhaxayso 1-5 sano, oo xilhaayeha xannaanadda/waalidka yahay shaqo-doone ama qaatay fasax waalidiinta u sabab ah xannaanaynta ilmaha yaryar. Fursadda booska xannaanadda ilmaha waxay ka kooban tahay dugsiga xannaanadda /barbaarin 4 saacadood maalintii ee dugsiyada xannaanadda/barbaarinta ee Dowladda hoose Linköping maamusho. Maamuleyaasha gaarka ah oo keliya ayaa go`aan ka gaara tirada saacadaha, 15 saacado/todobaadkii ayaa sharciga ku xusan. Agaasimaha dugsiga ayaa go`aan ka gaara sida saacadaha loogu qaybin doono dugsiga xannaanadda kasta. Ulajeeddada waxay tahay in ilmaha la siiyo fursad, horumarkiisa dartiisa, ka qaybgalo dhaqdhaqaaqa barbaarinta.

- Laga bilaabo xilliga dayrta ee u cunugga buuxsan doono saddex sano, waa in loo soo bandhigo booska dugsiga xannaanadda, ugu yaraan 525 saacadood sannadkii / sanadka kalandarka. Dugsiyada xannaanadda ee Dowladda hoose Linköping maamusho waxaa laga hela fursad 4 saacadood maalintii. Maamuleyaasha gaarka ayaa go`aan ka gaara tirada saacadaha, 15 saacado/todobaadkii ayaa sharciga ku xusan. Boosaska waxaa la isticmaali karaa oo keliya maalmaha dugsi-dhigashada, lama isticmaali karo maalmaha fasaxa iskuullada ama aqoon-kororsiga. Agaasimaha dugsiga ayaa go`aan ka gaara sida saacadaha loogu qaybin doono dugsiga xannaanadda kasta.
- Shaqo/waxbarasho wadajir fasaxa waalidiinta ama shaqo-doonasho dartood loola helo laba nooc oo meelaynta ah. Ilmaha waxay yeelan karaan oo keliya hal nooc oo ku meelayn ah, taasoo ku salaysan saacadaha ku sugnaanshada ilmaha.

Ilmaha da`dooda u dhaxayso hal ilaa shan sano, waxay xaq ugu leeyihiin xannaanadda ilmaha haddii ugu yaraan hal shardi shuruudaha hoos ku qoran laga buuxin karo:

- Dhammaan xubnaha qoyska ay haystaan Tobbanka lambar aqoonsiga ee dalka Iswiidan.
- Dhammaan xubnaha qoyska ay jinsiyad ka haystaan Isbahaysiga Dalalka Yurub, oona haystaan caddayn in adrees ay Linköping ku leeyihiin.
- Xilhaayeha xannaanadda/waalidka waa magangeliyo-doone wuxuuna haysta kaarka loo yaqaanno [LMA-kort] iyo ruqsadda in u ka shaqaysan karo ama wax ku baran karo dalka Iswiidan (AT-UND).

Haddii xilhaayeha xannaanadda/waalidka usan haysan ruqsadda in u ka shaqaysan karo ama wax ku baran karo dalka Iswiidan (AT-UND), haddana ilmaha waxay xaq ku leeyihiin dugsiga xannaanadda 4 saacadood /maalintii, taasoo laga bilaabo bisha agoosto sannadka ilmaha u buuxsan doono saddex sano.

# Saacadaha goobaha ay furan yihiin

Saacadaha dugsiyada xanaanada, goobaha barbaarinta iyo goobaha wakhtilummiska waxay furan yihiin 06.00–18.30.

## Isku-darka xannaanadaha ilmaha

Fursadda booska xannaanadda ilmaha waxaa la heli karaa dhammaan maalmaha aan fasaxa ahayn. Isku-darida dhawr dugsiyada xannaanadda /goobaha wakhtilummiska, ayaa dhici karto xilliyada fasaxa, maalmaha fasaxyada u dhaxeeyo, maalmaha aqoon-kororsiga iwm. Xaaladaha kale ee sababi karo isku-darka.

## Maalmaha aqoon-kororsiga shaqaalaha

Afar maalmood sannadkii ayaa goobaha xannaanadda ilmaha albaabada loo xira, taasoo u sabab ah maalmaha aqoon-kororsiga shaqaalaha. Khidmadaha/kharashyadaha wax saamayn ah arrintaan kuma yeelaan doonto. Go`aanka maalmaha aqoon-kororsiga shaqaalaha waxaa la gaar biloowga xilli-dugsiyeed kasta. Waxaa la heli karaa beddelka xannaanadda ilmaha.

# Codsashada xanaanada ilmaha dugsiga xanaanada iyo barbaarinta

## Goobaha xannaanadda ee Dowladda Hoose maamusho

Waxaa booska toos looga codsan karaa iyadoo la adeegsanayo adeegga elektroonikada ee Dowladda Hoose Linköping [www.linkoping.se](http://www.linkoping.se) Förskola och utbildning. Khadka taleefanka kala xiriir maamulka Linköping: 013-20 60 00, Haddii su`aallo aad waydiin lahayd.

## Xannaanada ilmaha ee gaar ahaanta loo maamulo

Xannaanada ilmaha ee gaar ahaanta maamule madaxbannaan u maareeyo badidooda, waxaa boos laga codsan karaa iyadoo la adeegsado barta internetka ee dowladda hoose, [www.linkoping.se](http://www.linkoping.se) Förskola och utbildning. Toos ayaad ula xiriiri kartaa kuwa kale. Barta internetka ee Dowladda Hoose waxaa laga akhrisan karaa liis ku qoran adreesyada, lanbarrada taleefoonada iyo jihaynta waxbarashada.

## Damaanada booska

Maamulka degmada, oo ah maamuleha guud, waa in codsadeha u boos ka siiyo goobaha xannaanadda ee u maamulka degmada maareeyo, 4 bilood gudahooda tiriskaas oo laga soo bilaabo taariikhda safka. Waajibkaan ma khuseeyo goobaha xannaanadda ee gaar ahaan loo maamulo (dugsiga xannaanadda ee madaxbannaan ama barbaarinta). Sida qofku u xaq ugu lahaado damaanada booska xannaanadda, waa in ugu yaraan hal goob xannaanad oo u Maamulka degmada maamulo ka doortay boos.

Boos ka codsashada xannaanadda ilmaha ee Dowladda hoose maamusho, waxaad ka xulan kartaa ugu badnaan saddex waax, kuwaasoo mid kamid ah doonayso in ubadkaaga boos laga siiyo.

Waa inaad ugu yaraan afar bilood kahor taariikhda ubadkaaga boos xannaanadda ugu codsato (ku xisaab wakhtiga la qabsiinta), taasoo waafaqsan nidaamyada ”Yaa la boos laga siin karaa xannaanadda ilmaha? ”. Boosaska sida hoor ku qoran ayaa loo kala bixiyaa:

1. Saf ka hormaris
2. Muddada u waalidku saf booska xannaanadda ugu jiray

3. Walaalaha
4. Da´da

# Nidaamyada safafka

## 1 Saf ka hormaris

Ilmaha waa in boos xannaanadda ilmaha laga siiya kaddib markii codsiga laga arrinsado taasoo waafaqsan Xeerarka iskuullada 8 cutubka. 5 iyo 7 §§, 25 cutubka. 2 § Haddii ilmaha u leeyahay baahida u gaar ah, taasoo u sabab ah xaaladda qoyska ama haddii ilmaha u la dhiban yahay dhibaato dhinaca jirka, nafsiga ama sabab kale darteed u baahan yahay taageero gaar ah oo ku salaysan dugsiga xannaanadda /goobaha wakhtilummiska u ku horumariyo.

Waa in codsi Agaasimaha dugsiga ku yaallo degmada u ilmaha degan yahay loo qorto. Baahida jirta waa shahaado laga xaqiijiyo, tusaale Daryeelka caafimaad-darrada nafsiga ee carruurta iyo dhallinyarada [Barn- och ungdompsykiatri BUP). Waxaa la siin karaa Saf ka hormaris, laakin helida dugsiga xannaanadda ee gaar ah lagama damaanad qaadi karo. Waxaa boos laga siin karaa halka baahidiisa si heer sare ah wax looga qaban karo.

Go`aanka waxaa gaaro madaxa goobta. Agaasimaha dugsiga waxaa xilsaaran in la dejiyo qorshaha hawlgalka.

## 2 Muddada u waalidku saf booska xannaanadda ugu jiray

Markii aad boos ka dalbado xannaanadda ilmaha waxaa ilmaha la siinayaa taariikhda safka. Taariikhda safka marna ma noqon karto afar bilood kahor, tiriskaas oo laga soo bilaabo taariikhda bilaabista ee la codsaday.

Haddii boos laga siiyo xannaanadda ilmaha oo aan waafaqsanayn xulashadaada koowaad, waxaad iyadoo fiirogaar aan la siin aqbalidaada ama diidmadaada, waxaad xaq ku leedahay inaad safka xulashadii koowaad, adigoo hab firfircoon hab-dhiska codsashada wargeliyo hab waafaqsan tilmaanta.

Waxaad haysanaysaa taariikhda safka hore. Haddii aadan na wargelin inaad safka isaga jiri doonto, waxaa ka lummi doono safkii ubadkaaga u ku jiray.

Haddiise xulashada koowaad ee aad codsatay lagu siiiyo, oona diido waxaa laga cirirbtiri doonaa hab-dhiska safafka codsashada.

Ku saabsan dib u meelaynta ee isla goobta xannaanadda, waxay sannadkii dhacda bisha agoosto oo keliya. Waxaad haysanaysaa taariikhda safka ee hore. Go`aan ku saabsan ka weecashada nidaamka u degsan dib ku meelaynta, waxaa haddii ay jirto sabab gaar ah gaara madaxa waaxda dugsiga xannaanadda, haddii wakiilasho u ka haysto Guddiga arrimaha ilmaha iyo dhallinyarada. Beddelaadda ku meelaynta inta u dhaxaysa goobaha maamuleha ama inta u dhaxaysa maamuleyaasha wuxuu dhacaa markii boos la heli karo hadba taariikhda ku meelaynta ee la codsaday.

### 3 Walaalaha

Qeexida walaalaha waxaa weeyaan walaalaha isku aabbe iyo isku hooyo ah, walaalaha aan isku aabbe iyo isku hooyo ahayn iyo xitaa ilmaha isla qoyska la nool.

Walaalaha isku taariikhda safka leh waa in islamar booska loo soo bandhigo. Laakinse walaalaha lagama ballan qaadi karo in iska dugsi boos laga siiyo.

Haddii dhawr ilmo ay isku taariikh saf yihiin iyo *isla bishaas*, waa in walaalaha ilmaha berri hore lagu meeleeyay dugsiga xannaanadda /barbaarinta ay codsadeen, waa in iyaga marka hore fursadda la siiyo. Laakinse walaalaha lagama ballan qaadi karo in isla xannaanadda /barbaarinta boos laga siiyo.

### 4 Da`da

Haddii dhawr ilmaha ay isku taariikhda safka yihiin waxaa fursad la siinayaa kan ugu wayn.

# Codsashada goobaha wakhtilummiska

Waxaa booska toos looga codsan karaa iyadoo la adeegsanayo adeegga elektroonikada ee Dowladda Hoose Linköping www.linkoping.se Förskola och utbildning. Khadka taleefanka kala xiriir maamulka Linköping: 013-20 60 00, Haddii su`aallo aad waydiin lahayd. Goobaha wakhtilummiska saf looma galo, ee waxaa sida ugu dhaqsida badan boos ardayga looga helaa iskuulka lagu meeleeyay. Ku saabsan goobaha dhaqdhaqaaqa wakhtilummiska ee albaabada u furan waxaa dhici karto in tirada boosaska ay xadadan yihiin.

# Gogoldhig

Gogoldhig (berri hore la oran jiray la qabsiin) badi ahaan laba toddobaad iyo waxaana la bilaabi karaa maalinta ku qorista. Kharashka xannaanadda waxaa la bixiyaa laga bilaabo maalinta ku qorista.

Guud ahaan lama bilaabo wax gogoldhig ah xilliyada dhawr dugsiyada xannaanadda /goobaha wakhtilummiska ay isku-darsan yihiin (warbixin dheeraad ka aqriso hoosta cinwaanka Isku-darka goobaha xannaanadda ilmaha).

# Khidmadaha/kharashyadaha

Ku saabsan kharashyada xannaanadda ilmaha wuxuu Maamulka Linköping isticmaala kharashka ugu badan, taasoo macneheeda tahay in kharashka ugu badan lagu saleeyo isku-darka daqliga qoyska kahor inta canshuuraha laga jarin ilaa ugu badnaantii (56 250 kr bishii laga bilaabo bisha jannayo 2024). Khidmadaha/kharashyadaha waxaa la bixiyaa 12 bilood sannadkii.

- Markii khidmadaha/kharashyadaha xannaanadda ilmaha wax laga beddelayo waxaa lagu dhaqaaqa 1:da agoosto oo ah markii ilmaha ay buuxsanayaan 3, 6, ama 10 sano.

Ilmaha isku qoys/hoyga ah oona mid xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta xilsaaran bixinta kharashka xannaanadda ilmaha, waa sida walaalo oo kale waxaana sidaas la siiyaa khidmadaha/kharashyadaha dhimista tirada ilmaha. Heerka khidmadaha/kharashyadaha waa hadba isku-darka daqliga qoyska kahor inta aan canshuurta laga jarin (aqriso warbixinta gaar ahaan ku saabsan daqliga).

Waafaqsan Xeerka Iskuullada, Cutubka 8:aad. Qodobka 20:aad § iyo 14:aad cutubka. Qodobka 19:aad § kharashyada maareeyaha gaarka lama rabo in aad u badan yihiin.

## khidmadaha/kharashyadaha ugu badan bishii

| | Dugsiga xannaanadda, Barbaarinta 1-2 sano | Dugsiga xannaanadda, Barbaarinta 3-5 sano | Dugsiga xannaanadda, Khidmadaha/ kharashyadaha xannaanadda ilmaha ee waalidka shaqo la`aan, fasaxa waalidiinta 1-2 sano | Dugsiga xannaanadda, Khidmadaha/ kharashyadaha xannaanadda ilmaha ee waalidka shaqo la`aan, fasaxa waalidiinta 3-5 sano | Goobaha wakhtilummiska da`dooda u dhaxayso 6-9 sano | Goobaha wakhtilummiska da`dooda u dhaxayso 10-13 sano | Dhaqdhaqaaqa wakhtilummiska oo diwaangelinta u baahnayn da`dooda u dhaxayso 10-13 sano | *Xannaanada-subaxdii da`dooda u dhaxayso 10-13 sano |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| **Ilmaha 1/ilmaha ugu yar** | boqolkiiba 3 % daqliga – laakiin ugu badnaan 1688 kr | boqolkiiba 2,1 % daqliga – laakiin ugu badnaan 1181 kr | boqolkiiba 3 % daqliga – laakiin ugu badnaan 1688 kr | boqolkiiba 0,51 % daqliga – laakiin ugu badnaan 287 kr | boqolkiiba 2 % daqliga – laakiin ugu badnaan 1125 kr | Boqolkiiba 1,4 % daqliga – laakiin ugu badnaantii 788 kr | boqolkiiba 1 % daqliga – laakiin ugu badnaan 563 kr | boqolkiiba 0.2 % daqliga laakiin ugu badnaan 113 kr |
| **Ilmaha 2-aad** | boqolkiiba 2 % daqliga – laakiin ugu badnaan 1125 kr | boqolkiiba 1,4 % daqliga – laakiin ugu badnaan 788 kr | boqolkiiba 2 % daqliga – laakiin ugu badnaan 1125 kr | boqolkiiba 0,34 % daqliga – laakiin ugu badnaan 191 kr | boqolkiiba 1 % daqliga – laakiin ugu badnaan 563 kr | Boqolkiiba 0,7 % daqliga – laakiin ugu badnaantii 394 kr | boqolkiiba 0,5 % daqliga – laakiin ugu badnaan 281 kr | boqolkiiba 0.1 % daqliga laakiin ugu badnaan 56 kr |
| **Ilmaha 3-aad** | boqolkiiba 1 % daqliga – laakiin ugu badnaan 563 kr | boqolkiiba 0,7 % daqliga – laakiin aan ka badnayn 394 kr | boqolkiiba 1 % daqliga – laakiin ugu badnaan 563 kr | boqolkiiba 0,17 % daqliga – laakiin ugu badnaan 96 kr | boqolkiiba 1 % daqliga – laakiin ugu badnaan 563 kr | Boqolkiiba 0,7 % daqliga – laakiin ugu badnaantii 394 kr | boqolkiiba 0,5 % daqliga – laakiin ugu badnaan 281 kr | boqolkiiba 0.1 % daqliga laakiin ugu badnaan 56 kr |
| **Ilmaha 4-aad iwm** | boqolkiiba 0 % daqliga | boqolkiiba 0 % daqliga | boqolkiiba 0 % daqliga | boqolkiiba 0 % daqliga | boqolkiiba 0 % daqliga | boqolkiiba 0 % daqliga | boqolkiiba 0 % daqliga | boqolkiiba 0 % daqliga |

*Xannaanada subaxdii waxaa la iibsan karaa oo keliya haddii cunugga u islamarkaas ka diiwan gashan yahay öppen fritidsverksamhet oo gaar ah.

## Khidmadaha/kharashyadaha xannaanada saacadaha hore iyo kuwa dambe ee habeenkii iyo sabti/axad/maalin fasax ah

Ilmaha ku qoran xannaanad saacadaha habeenkii hore iyo kuwa dambe ba iyo sabti/axad/maalin fasax ah waxay bixinayaan Khidmadaha/kharashyadaha taasoo waafaqsan khidmadaha/kharashyadaha ugu badan.

## Khidmadaha/kharashyadaha ee ilmaha da`dooda u dhaxayso 3-5 sano dugsiga xannaanadda guud

Ku saabsan ilmaha da'dooda u dhaxayso 3-5 sano oo muddo xilli dugsiga xannaanadda lagu xannaanadeeyo 4 saacadood maalintii oo keliya.

Ku saabsan ilmaha da'dooda u dhaxayso 3-5 sano oo kormeerid u baahan oona boos ka haysto dugsiga xannaanadda ama xannaanad iyo wax-barid waxaa laga bilaabo 1:da agoosto sannadka ilmaha u buuxsado 3 sano la bixiyaa khidmadaha/kharashyadaha u dhigmata boqolkiiba 70 % khidmadaha/kharashyadaha ugu badan.

## Khidmadaha/kharashyadaha xannaanadda ilmaha ee waalidka shaqo la`aan, fasaxa waalidiinta

Ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-5 sano oo xilhaayeha xannaanadda/waalidka yahay ama noqon doono shaqolaawe/qaadan doono fasaxa waalidiinta waxay xaq ugu leeyihiin boos dugsiga xannaanadda /barbaarinta 4 saacadood maalintii.(waafaqsan sharciga 15 saacado/todobaadkii). Ilmaha 1-2 sano waxaa la bixiyaa Khidmadaha/kharashyadaha taasoo waafaqsan khidmadaha/kharashyadaha ugu badan, kor ka eeg liiska. Laga bilaabo 1:da agoosto sannadka ilmaha u buuxsado 3 sano waxaa la bixiyaa khidmadaha/kharashyadaha u dhigmata boqolkiiba 17 % khidmadaha/kharashyadaha ugu badan.

## Khidmadaha/kharashyadaha xannaanadda ilmaha ee kummeelgaarka ah da` dooda 6-13 sano u dhaxayso

Khidmadaha/kharashyadaha waa 50 karoon maalintii kormeerid muddo 3 saacadood iyo qado la`aan, ama 100 karoon maalintii ka badan 3 saacadood. Walaalaha dartood khidmadaha/kharashyadaha waxba laga ma dhimo.

## Khidmadaha/kharashyadaha ilmaha oo la ogolaaday, xannaanadda ilmaha taasoo u sabab ah baahida taageero gaar ah

Ku saabsan khidmadaha/kharashyadaha ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-5 sano oo la ogolaaday xannaanadda taasoo u sabab ah baahida taageero gaar ah (Xeerarka iskuullada cutubka 8:aad. qodobka 7:aad §) waxay bixinayaan hab waafaqsan cutubka 8:aad. Qodobka 16:aad §, qaybta ka badan 15 saacadood/todobaadkii (u dhigmata 62,5% kharashyada ugu badan).

Ilmaha iskuullada da` dooda 6-13 sano u dhaxayso oo sabab jirka, nafsiga ama sabab kale darteed u baahan yahay taageero gaar ah, oo ay ku horumariyaan oona boos laga siiyay dugsiga xannaanadda /barbaarinta, waxaa la bixiyaa khidmadaha/kharashyadaha u dhigmata boqolkiiba 62,5 khidmadaha/kharashyadaha ugu badan, waa haddii go`aanka saacadaha ku sugnaanshada ay ka badan yihiin 10 saacadood todobaadkii.

## Xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta oo aan isku hoy ahayn

Xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta oo aan isku hoy ahayn
laakin xilhaynta xannaanadda wadaaga, waa in labadooda ay yihiin milkiyeyaasha booska waa haddii labadooda ba ay ka faa`iidaysanayaan booska xannaanadda ilmaha. Ilmaha hal boos xannaanadda ayay leeyihiin, laakin milkiyeyaasha booska xannaanadda waxaa midkiiba loo soo diri doonaa qaansheegashada (qaansheegashada qaybsan). Xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta oo kala guura, waa in ay si wadaan bixinta isla lacagta ay bixin jireen ee booska xannaanadda ilmaha. Inta u qoys kasta ka bixin doono isku-darka lacagta, waa hadba daqliga qoyska cusub. Khidmadaha/kharashyadaha waxaa gundhig u ah, isku-darka daqliga qoysaska, inkastoo haddana aynan isku hoy ahayn oo ay kala tageen. Isku-darka khidmadaha/kharashyadaha kama badnaan karo khidmadaha/kharashyadaha ugu badan.

- Haddii heerka daqliyada qoysaska ay isku mid yihiin, waxay xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta si siman u qaybsanayaan bixinta khidmadaha/kharashyadaha.
- Haddiise daqliyada xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay kala duwan yihiin, waxaa inta badan bixin doono xilhaayeha xannaanadda/waalidka daqligiisa ka badan kan kale. Taasoo loo yaqaanno khidmadaha/kharashyadaha muhimsan/miisansan.

Xilhaayeha xannaanadda/waalidka kasta waxaa xilsaaran qaybtiisa khidmada/kharashka xannaanadda ilmaha iyo in u maamulka wargeliyo dib u soo celinta booska xannaanadda ee isaga khuseeyo. Muddada ogeysiinta waa 2 bilood. Haddii xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta midkood u baahan yahay booska xannaanadda waa in u keligiis bixiyo khidmada/kharashka xannaanadda ilmaha oo idil. Xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta oo muddada furniinka la siiyay muddada tijaabada, oo mid kasta rasmi ahaan ka diiwan gashan adreeskiisa, waxaa khuseeyo isla shuruudaha khidmada/kharashka xannaanadda ilmaha ee kor ku xusan.

## Ka jarista khidmadaha/kharashyadaha

Mararka qaarkood waxaa dhici karto in aan la oggolayn in booska xannaanadda ilmaha la isticmaalo. Waxaa sabab u noqon karto tusaale in xannaanadeyeha u xannuunsan yahay oona aan la heli karin qof kale. Sidoo kale waxaa dhici karto in dugsiga xannaanadda/goobta wakhtilummiska albaabada loo xiro haddii ay jirto sabab gaar ah, tusaale safmar. Xaaladdaas Khidmadaha/kharashyadaha bileedka ayaa 1/30 laga jaraya maalin kasta u cunugga ku sugnayn goobaha xannaanadda. Isla mabda`aas ayaa hirgala haddii xannuun darran u jiro ama cunugga la qaadsiiyo bakteeriyeyaal oo aan dawooyinka waxba ka tarayn, oona Dhakhtarka kormeerida cudurrada faafa [smittkyddsläkaren] amar ku bixiyo in cunugga usan xannaanadda tegin.

Afarta maalmood ee sannadkii oo ay shaqaalaha (aqoon-kororsi) ku maqan yihiin, waxna lagama jaro Khidmadaha/kharashyadaha bileedka.

Go`aanka wax ka jarista Khidmadaha/kharashyadaha bileedka, waxay dhici kartaa haddii ay jirto sabab gaar ah waxaana gaari karo madaxa waaxda dugsiga xannaanadda iyo madaxa

waaxda dugsiyada biloowga/hoose/dhexe oo wakiilasho ka haysto Guddiga arrimaha ilmaha iyo dhallinyarada.

## Qaansheegashada

Kharashka xannaanadda ee goobaha Dowladda Hoose waxaa la bixiyaa bisha lagu guda-jiro. Maamulka degmada wuxuu qaansheegashada bil kasta soo dira markii bisha qiyaastii ku beegan tahay 20:ka. Fursadda bixinta ee ugu dambeyso waxaa maalinta bisha ugu dambeyso.

Warbixin ku saabsan qaansheegashada elektroonikada iyo foomka lagu codsado autogiro waxaa laga hela barta internetka ee dowladda hoose.

Haddii daqligii qoyska ee maamulka berri hore la wargeliyay, la ogaado in usan waafaqsanayn daqliga dowladda la wargeliyay, waxaa dhici karto in maamulka degmada u dalbado in la bixiyo farqiqa u dhaxeeyo khidmada/kharashka xannaanadda hore iyo Khidmadaha/kharashyadaha ahayd in la bixiyo kuwaasoo waafaqsan daqliga dowladda la wargeliyay.

Qaansheegashada khidmadaha/kharashyadaha bileedka aan la bixin iyo/ama qaansheegashada ku xigta waxaa la bixin doonaa khidmada xusuusinta bixinta qaansheegashada oo ah 60 kr kaddib markii qiyaastii ay ka soo wareegato hal toddobaad. Qaansheegashada khidmadaha/kharashyadaha bileedka aan la bixin waxaa kaddib markii 20 maalmood ay ka soo wareegato maalintii ugu dambaysay ee la bixin lahaa, waxaa lagu wareejin doonaa shirkadaha lacagaha dadka ka soo saarto. Haddii tallaabadaas kaddib aan khidmadaha/kharashyadaha aan la bixin waxaa albaabada goobta xannaanadda laga xiran doonaa cunugga.

Haddii albaabada loo xirto waa in daynta gebi ahaan la bixiyo, kahor inta boos mar kale laga siin goobta xannaanadda.

Haddiise daynta ay xiriir la leedahay go`aanka dib u qaabaynta/nadiifinta daymaha [skuldsanering], kaasoo la tixgeliyo xaaladdaas waxaa la oran karaa daynta waa la bixiyay.

Xitaa go`aanka ah in aan la fulin albaab ka xirida waxaa gaari kara waaxda dugsiga xannaanadda iyo madaxa waaxda dugsiyada biloowga/hoose/dhexe oo wakiilasho ka haysto Guddiga arrimaha ilmaha iyo dhallinyarada waa haddii sabab gaar ah ay jirto.

Albaab ka xirid kaddib waa in waalidku u mar labaad boos ubadkiisa ugu codsado xannaanadda.

# Daqliga

## Xisaabinta daqliyada

Khidmadaha/kharashyadaha xannaanadda waxaa gundhig u ah isku-darka daqliga qoyska ee bil kasta kahor inta aan canshuurta laga jarin. Macnaha [hushåll] waxaa weeyaan keli noole ilmo leh ama lamaaneyaasha rasmi ahaan ka diiwan gashan isla adreeska. Lamaaayaasha waxay la siman yihiin laba qof ee isla nool oo laakin is-qabin, kana diiwaan gashan isla adreeska.

## Daqliyada oo ay khidmadaha/kharashyadaha gundhigga u ah

Daqliyada oo ay khidmadaha/kharashyadaha gundhigga u ah waxaa weeyaan mushaharka inta aan canshuurta laga jarin, iyo daqliyadaha kale ee canshuurta laga bixiyo ee kooxaha daqliyada, iyo xad-dhaafka kooxaha daqliyada dhaqdhaqaaqa ganacsiga ee sannad-daqliyeedka sida hadba waafaqsan Sharciga daqliyada.

## Daqliyadaha kale ee canshuuraha laga bixiyo

Xaaladaha badidooda waxaa loola jeeda gunnooyika iyo kaalmo-dhaqaaleedka kahor inta aan canshuuraha laga jarin:

- Gunnada kharashyada ee ka badan lacagta sharci ahaan laga jari karo (tusaale kharashka baabuurka iyo kan hoyga iwm)
- Lacagta bukaanka [sjukpenning], lacagta bukaha oo ebed shaqaysan karin [sjukersättning], gunnada dhaqdhaqaaqa [aktivitetsersättning]
- Lacagta waalidiinta [Föräldrapenning]
- Faa`iidooyinka hawlgabnimada
- Lacagta dhaawaca shaqada [Livränta] (qaybta canshuurta laga bixiyo)
- Gunnada xiriirka la leh shaqo la` aan iyo/ama talaabo ka qaadista suuqa shaqada
- Kaalmo-dhaqaaleedka qoysaska oo kooban Lacagta waalidiinta ee xiriirka la leh gudashada tababarka waajibka qaranka [värnpliktstjänstgöring]
- Lacagta loogu talagalay carruurta itaaldarran [Vårdbidrag] (boqolkiiba 60 % lacagta)
- Gunnada guryaha qoysaska [Familjehemsersättning] (qaybta gunnada) Qoysaska ilmahooda ku meelaysan guryaha qoysaska loo yaqaanno [familjehem] daqligooda lama xisaabiyo
- Faa´iidooyinka shaqo-bixiyeha u shaqaalaha siiyo [naturaförmåner] oo canshuuraha laga bixiyo
- Gunnada shaqo ka fadhiisashada [Konfliktersättning]
- Kaalmo-dhaqaaleedka ee loogu talagalay ardayda cilmibaarista barato

## Gunnooyinka kale ee gundhigga u ah khidmadaha/kharashyadaha

- Shaqaalaha martida ah iyo ardayda martida ah ee dibadda laga masruufo.

## Daqliyada aan shaqo ku lahayn Khidmadaha/kharashyadaha

- Masruufka uu bixiyo waalidka aan ilmihiisa la noolayn [underhållsbidrag], Taageerada masruufka ee Khasnadda caymiska bulshada ay siiyo xilhaayeha xannaanadda/waalidka ee ilmihiisa la nool [Underhållsstöd
- Kaalmo-dhaqaaleedka ilmaha [barnbidrag]
- Taageero-dhaqaaleedka waxbarashada [Statligt studiestöd]
- Taageero-dhaqaaleedka kirada [Bostadsbidrag]
- Guunnada itaaldarrada [Handikappersättning]
- Taageero-dhaqaaleedyada u maamulka arrimaha bulshada bixiyo
- Gunnada sal-dhigida [Etableringsersättning]

- Taageero-dhaqaaleedka Hay’adda Socdaalka bixiso
- Gunnada Ilmaha agoonta [Barnpension

## Wargelinta daqliga iyo wax iska beddelka khidmadaha/kharashyadaha

Waa in wargelinta daqliga lagu dhaqaaqa:

- Markii ilmaha ay bilaabaan xannaanadda
- 12:dii bilood ba hal mar
- Markii daqliga qoyska u wax iska beddelo
- Haddii maamulka degmada u codsado

Xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta oo ilmahooda goobaha xannaanadda lagu xannaanadeeyo waxaa waajib ku ah in maamulka ay wargeliyaan daqliga qoyska ee gundhigga u ah khidmadaha/kharashyadaha. Daqliga markaas qoyska soo gala waa in maamulka la wargeliyo markii ubadkooda u bilaabi doono xannaanadda, sidoo kale haddii wax iska beddelaan isku-darka daqliyada qoyska kahor inta aan canshuuraha laga jarin, laakin 12:kii bilood ba hal mar. Waa in daqli sannadeedka maamulka la wargeliyo, xitaa haddii daqliyada aynan waxba iska beddelin.

Haddii xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta aynan maamulka wargelin daqliga saxda ah hal mar sannadkii (12:dii bilood ba) ama kaddib markii qoraal loo soo diro aynan maamulka wargelin, waxaa dhici karto in laga codsado in ay bixiyaan heerka ugu sareeyo ee khidmadaha/kharashyadaha xannaanadda.

Nidaamka waxaa ka reeban qoyska maammulka wargeliyo daqli ka badan heerka ugu sareeyo ee daqliyada (56 250 karoon bishii laga bilaabo jannayo 2024). Kuwaasi waxaa lagu meeleeyaa heerka ugu sareeyo ee khidmadaha/kharashyadaha, sidaas awgeed u ma baahna in maamulka ay wargeliyaan daqliga 12:dii bishii.

Maamulka degmada wuxuu qoyska ka codsan karaa in qoraallo u ku cadeeyo daqliga u maamulka wargeliyay, tusaale caddaynta laba hoy, qoraallada mushaharrada ama caddaynta shaqo bixiyeha.

Xogta waxaa lagu bixiya sharaf iyo damiir. Haddii ugu talagal ahaan maamulka la wargeliyo daqli aan sax ahayn, waxaa dhici karto in ilmaha albaabada xannaanadda laga xirto.

# Is-beddelada, hakad-gelin iyo ogeysiinta dib u soo celinta boosaska

## Xaaladda qoyska oo wax iska beddeleen

Hal cunug wuxuu heli karaa hal boos oo keliya. Nidaamka waa sidaas iyadoo aan fiirogaar la siin haddii ilmaha u kolka hal waalid la nool yahay kuwaasoo ku nool isla degmo ama kala degmo. Xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta waxaa xilsaaran in ay ku heshiyaan waaxda xannaanadda ee ubadkooda lagu meelayn doono. Haddiise arrintaas

xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta aynan ku heshin karin, waxaa halka lagu meelayn doono lagu salayn doonaa adreeska u rasmi ahaan ka diiwan gashan yahay.

## Xannaanada ilmaha ee waalidiinta jirrada ku qoran ama qaato gunnada uurleeyda

Xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta jirro lagu qoro kuwaasoo ilmahooda boos ka haysto waxay ilmahooda xaq ku leeyihiin xannaanadda. Khidmadaha/kharashyadaha waxaa la bixiyaa hab waafaqsan sicirka caadiga ah. Isla nidaamkaas ayaa hirgala gunnada dumarka uurka leh. Ilmaha waxay xannaanada ku sugnaan karaa saacadahiisa.

Ilmaha ku meelaysan xannaanadda waxay xaq ku leeyihiin in xannaanadda ku sugnaadaan markii waalidiintooda ay walaalahooda xannuunsan ku daryeelayaan guriga, (VAB)

## Wargelinta is-beddelka ku meelaynta ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-5 sano oo waalidiintooda fasax ku maqan

Xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta oo boos ka haysto dugsiga xannaanadda /barbaarinta da`dooda u dhaxayso 1-5 sano, waa in beddeladda noocaas uu maamulka wargeliyo laba bilood kahor. Xilhaayeha xannaanadda/waalidka ee fasaxa waalidiinta ku maqan, ama xilhaayeha xannaanadda/waalidka ilmaha ku meelaysan dugsiga xannaanadda guud, waa in ugu yaraan laba bilood kahor beddeladda wargelin laga helo. Wax ka beddelka gundhigga ku meelayn waxaa maamulka lagu wargelin karaa iyadoo la adeegsanayo adeegyada farsamada digitalka ku salaysan [e-tjänsten] ee barta internetka Dowladda hoose Linköping.

## Iska beddelka booska

Haddii cunugga/ardayga laga beddelo dugsiga xannaanadda/xannaanadda barbaarinta ama iskuul iyo goobta wakhtilummiska ku yaalaan degmada Linköping xaaladdaas muddada ogeysiinta looma baahna. Haddii cunugga/ardayga laga beddelo dugsiga xannaanadda/xannaanadda barbaarinta ama iskuul iyo goobta wakhtilummiska ku yaalaan degmo aan Linköping ahayn, waa in xaaladdaas laba bilood kahor maamulka lagu wargeliyo farsamada digitalka ku salaysan [e-tjänsten].

## Hakad

Booska xannaanadda ilmaha wuu haysanayaa qoyska muddada aan la isticmaalayn, sida tusaale markii xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay fasax iwm ku maqan yihiin, laakin ugu badnaaantii 3 bilood. Xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta waa in maamuleha ay wargeliyaan muddada hakad gelinta baahida xannaanadda. Haddiise la filanayo hakad-gelin ka badan muddo 3 bilood ah, waa in xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta u qoraal Agaasimaha dugsiga arrinta mas`uul ka ah u qoraal u soo dira, laakin isku-darkii ugu badnaan 6 bilood. Muddada hakad-gelinta waa in kharashka xannaanadda la bixiyaa hab waafaqsan sicirka.

Haddii booska aan la isticmaalin oona wax wargelin ah aan laga helin xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta, waxaa 1 bil kaddib cunugga laga saarayaa diiwaanka. Kharashka xannaanadda ee muddadaas iyo laba bilood oo ah muddada ogeysiinta ayaa laga raba in xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay bixiyaan.

## Ogeysiinta dib u celinta booska

Markii ilmaha usan u baahnayn booska xannaanadda, waa in iyadoo la adeegsanayo farsamada digitalka ku salaysan [e-tjänsten] laba bilood kahor maamulka la ogeysiiya. Muddada ogeysiinta waxaa la bixiyaa khidmadaha/kharashyadaha xitaa haddii cunugga usan isticmaali doonin booska. Boos goobaha wakhtilummiska waa la isticmaali karaa muddada ogeysiinta haddii xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay shaqo la` aan yihiin. Markii xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay fasaxa waalidiinta qaadanayaan, ilmaha xaq kuma laha booska goobaha wakhtilummiska, sidaas darteed waa in laba bilood kahor fasaxa waalidiinta maamulka la ogeysiiya arrintaas.

Haddii xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay qaybsadaan qaansheegashada, waxaa milkiyeyaasha booska waajib ku ah in mid kasta u ogeysiinta dib u soo celinta booska maamulka wargeliyo. (Eeg xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta oo aan isku hoy ahayn) Ogeysiiska dib u soo celinta booska xannaanadda waxaa loogu dhaqaaqa barta internetka ee maamulka degmada, www.linkoping.se. Maalinta maamulka la wargeliyo ayuu tiriska muddada ogeysiinta dib u soo celinta booska xannaanadda bilaabanayaan.

Markii boos la aqbalo iyadoo la adeegsaday barta internetka ee maamulka degmada, waxay xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta ay heshiis sharciyeed la galeen maamulka. Macnaheedu waxaa weeyaan in markaas qofku ay waajib ku tahay in u bixiyo kharashka booska u aqbalay. Heshiiskaas waxaa laga ciribtiri karaa barta internetka ee maamulka, iyadoo maamulka la ogeysiiyo. Muddada ogeysiinta dib u soo celinta booska xannaanadda ee 2 bilood ka kooban ayaa hirgasho xitaa haddii booska aan la isticmaalin. Ogeysiinta dib u celinta booska looma baahna iska beddelka ku meelaynta dartiisa.

Go`aanka in nidaamyada Ogeysiiska dib u soo celinta booska xannaanadda kor xusan aan dhaqmin, waxaa gaari karo madaxa waaxda dugsiga xannaanadda iyo madaxa waaxda dugsiyada biloowga/hoose/dhexe wakiilasho ka haysto Guddiga arrimaha ilmaha iyo dhallinyarada, waa haddii sabab aad gaar u ah ay jirto.

Haddii kaddib markii ogeysiinta dib u soo celinta booska xannaanadda la sameeyay laga qoomameeyo, waa in arjay cusub booska xannaanadda loo soo qorta. Xaaladdaas qoyska laga ma ballan qaadi karo in boos laga siin doono isla goobta xannaanadda ee berri hore.

# Xannaanadaha saacadaha habeenkii hore iyo kuwa dambe ba iyo sabti/axad/maalin fasax ah

## Yaa xaq ku leh xannaanadda saacadaha habeenkii hore iyo kuwa dambe ba iyo sabti/axad/maalin fasax ah?

Qoysaska kormeerid u baahan taasoo u sabab ah shaqada ay qabtaan saacadaha aan caadiga ahayn ayaa boos ubadkooda u codsan karo. Saacadaha aan caadiga ahayn/ka reeban waa 06.00-18.30.

Ilmaha dugsiga xannaanadda oo da`dooda u dhaxayso 1-5 sano iyo ciyaal dugsi oo da`dooda u dhaxayso 6-13 sano, waxay ku meelayn heli karaan saacadaha aan caadiga ahayn, iyagoo islamarkaana ku meelayn maalinimada ka haystaan dugsiga xannaanadda/goobaha wakhtilummiska. Dugsiga xannaanadda ee maalinimada wuxuu ku ooli karaa degmada ama goob u dhow dhaqdhaqaaqa xannaanadda ee saacadaha habeenkii hore iyo kuwa dambe ba iyo sabti/axad/maalin fasax ah.

Xilhaayeyaasha xannaanadda/waalidiinta waxay boos codsan karaan laba goob, mid waa xulashada koowaad tan kalena xulashada labaad. Haddaba sidii xaq loogu yeesho xannaanadda saacadaha habeenkii hore iyo kuwa dambe ba iyo sabti/axad/maalin fasax ah, waa in baahida kormeerida ay tahay mid joogto ah, kana kooban tahay ugu yaraan 20 saacadood bishii. Bilowga waa in caddayn loo shaqeeyaha laga keena.

## Nidaamyada safafka hirgalay waa kuwee sideena loo codsada?

Waxaa laga codsada barta internetka ee dowladda hoose iyadoo la adeegsanayo farsamada digitalka ku salaysan [e-tjänsten] www.linkoping.se Förskola och utbildning

Boosaska waxaa loo soo bandhiga sida laysaga horeeyo iyo taariikhda safka. Ku saabsan xannaanadda noocaan ah boos lama ballan qaadi karo 4 bilood gudahood. Walaalaha ilmaha ee tan iyo berri hore lagu meeleeyay ayaa mudnaanta koowaad la siiya.

## Khidmadaha/kharashyadaha

Ilmaha boos laga siiyo xannaanadda saacadaha aan caadi ahayn waxay bixinayaan khidmadaha/kharashyadaha taasoo waafaqsan khidmadaha/kharashyadaha ugu badan. Hal khidmadaha/kharashyadaha ayaa laga bixiyaa xitaa haddii laba boos ay ku meelaysan yihiin.

## Saacadaha kormeerista

Maadaama aad tahay xilhaayeha xannaanadda/waalidka waxaa muhim ah inaad daahid la`aan diiwaan geliso saacadaha xannaanadda ee ubadkaaga. Ku saabsan dhaqdhaqaaqyada saacadaha habeenkii hore iyo kuwa dambe ba iyo sabti/axad/maalin fasax ah, waa in xilhaayeha xannaanadda/waalidka u adeegsado farsamada digitalka ku

salaysan [e-tjänsten] markii u diiwaan gelinayo saacadaha xannaanadda ubadkiisa. Haddii wax iska beddelka loola habsaamo damaanad lama qaadi karo in ubadkaaga xannaanadda lagu qaabili doono. Nidaamka wuxuu siiba muhim yahay maalmaha fasaxyada waawayn iyo xilliyada fasax-xilliyedyada. Muddada ugu dheer ee taxan oo ilmaha ku sugnaan karo xannaanadda waa saddex maalmood. Ilmaha xannaanadda lagu xannaanadeeyo waxay ku sugnaan karaan dhaqdhaqaaqa ugu badnaan 6 maalmood oo taxan. Kaddib ugu yaraan hal maalin oo toddobaad nasasho ah. Ilmaha aan xannaanadda seexan karin waa in goobta laga kaxeeyo kahor markii saacadda ay ku beegan tahay 21:00, iyadoo fiirogaar aan la siin da`da.

## Keenista iyo ka kaxaynta

Haddii dugsiga xannaanadda usan ku oolin goobaha dhaqdhaqaaqyada saacadaha habeenkii hore iyo kuwa dambe ba iyo sabti/axad/maalin fasax ah, wuxuu xilhaayeha xannaanadda/waalidka mas` uul ka yahay keenista iyo ka kaxaynta ubadkiisa. Xilhaayeha xannaanadda/waalidka ciyaal dugsiyeedka wuxuu isagoo adeegsanayo farsamada digitalka ku salaysan [e-tjänsten] ubadkiisa u dalban karaa gaadiidka iskuullada ee gaarka ah.

## Haddii baahida ay wax iska beddesho maxaa dhici doono?

Markii ilmaha usan u baahnayn booska xannaanadda, waa in laba bilood kahor maamulka la ogeysiiya. Muddada ogeysiinta waxaa la bixiyaa khidmadaha/kharashyadaha xitaa haddii cunugga usan isticmaali doonin booska.

Haddii boos aan la isticmaalin maamulka ayaa saddex bilood kaddib ciribtiri doono. Si gaar ah ayaa Agaasimaha dugsiga ugu arrinsan doono.

# Waaxda aleerjiya loogu talagalay ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-5 sano

Ilmaha da`dooda u dhaxayso 1-5 sano oo aad ula dhiban aleerjiya, waxaa lagu meelayn karaa waax gaar ahaan ilmaha dhiban loogu talagalay oo ku taallo Rättaregatan 120. Sida waaxdaan boos looga helo darteed waa in iskuulka codsi loo qorta, oona caddayn laga keena allergicentrum taasoo ku qoran baahida waxayn ee u ilmaha u qabo waxbarashada dhibatadiisa loola qabsiiyo. Xaaladaha kale waxaa dhici karto, in baahida gaarka ee cunugga ka sokkoow, xaaladda qoyska u ku sugan yahay arrinta gundhig looga dhigo.

Qoysaska ilmahooda waaxda lagu meeleeyay, waa in ay tixgeliyaan xad yeelista waaxda u degsan tusaale aan waaxda la keenin xayawaanada guriga, sigaar cabbid iyo waxyaalaha cadarka/barfuumka leh.

## Warbixin ku saabsan maaraynta warbixin-shaqsiyeedka

Maamulka xannaanadda wuxuu maareeya warbixin-shaqsiyeedka ilmaha iyo waalidiintooda kuwaasoo lagamamaarmaan u ah dhaqdhaqaaqa. Tusaale warbixin-shaqsiyeedka qoyska

waxaa kamid ah magaca, adreeska iyo Tobbanka lambar aqoonsiga. Xogta lagamamaarmaanka u ah diiwaan gelinta safka, ku meelayn iyo kharashyada xannaanadda. Xog laga soo xigsado Diiwaanka dadwaynaha folkbokföringsregistret.

Xogta la maareeyo waxaa xaaladaha qaarkood loo gudbiya Hay`adda Tirokoobka Qaranka Statistiska Centralbyrån.

In warbixin-shaqsiyeedka si sax ah loo maareeyo waxaa mas`uul ka ah Guddiga arrimaha ilmaha iyo dhallinyarada ee Maamulka Linköping. Haddii aad doonayso inaad ogaato xogta warbixin-shaqsiyeedka kugu saabsan waxaad kala xiriiri kartaa maamulka degmada. Waxaad xaq ku leedahay in la saxo haddii wax khalad ay xogta laga helo.

Guddiga arrimaha ilmaha iyo dhallinyarada wuxuu tixraaca qodobada sharciyada hirgaleen ku saabsan muddada warbixin-shaqsiyeedka la kaydin karo ama goorta arkifiyada Dowladda hoose Linköping lagu keydin doono. Wixii su`aallo ku saabsan muddada qoraallada la kaydin doono xiriir e-mailbarnochungdomsnamnden@utb.linkoping.se

Dib-u-eegistii ugu dambeeyay waxaa u sabab ahayd wax iska beddelka kharashyada ugu badan iyo xogta la qabsiinta helida.

Wixii cabasho ee xiriir la leh qaabka guddiga u maareeyay warbixin-shaqsiyeedka kala xiriir Hay`adda kormeerista Xogta Datainspektionen.

# Su'aalo

La xiriir:

La xiriir Linköping

Taleefan: 013-20 60 00 ama kontakt@linkoping.se

Booqo Kontakt Linköping:

Skäggetorp: Skäggetorps centrum 1a

City: Huvudbiblioteket, Östgötagatan 5

Berga: Herrgårdsgatan 3a

Warbixin dheeraad waxaad ka aqrisan kartaa barta internetka ee dowladda hoose, www.linkoping.se.